

# Shuruudaha Tallaalka ee Dugsiga Missouri 2021-2022

- Dhammaan ardayda waa inay soo bandhigaan dukumiintiyada heerka tallaalka ee ugu dambeeyay, oo ay ku jiraan bisha, maalinta, iyo sannadka ee tallaalka kasta kahor intaanay xaadirin dugsiga.
- Guddiga La-talinta ee Habdhaqannada Tallaalka (ACIP) ayaa oggolaanayaa muddo 4 maalmood oo dib-udhigid ah. Ardayda ku jirta dhammaan heerarka fasallada waxay ku heli karaan tallaalkada illaa afar maalmood kahor taariikhda loo qabtay.
- Tallaalkada loo baahan yahay waa in lagu bixiyaa sida ku xusan Jadwalka Habdhaqannada Tallaalka ee Guddiga La-talinta oo ay ku jiraan kala-fogaynta oo dhan, (<http://www.cdc.gov/vaccines/schedules/index.html>).
- Si ay ugu sii jiraan dugsiga, ardayda " ay u socoto" waa inay ku lahaadaan Tallaalka foomka U Socoshada (Imm.P.14). U Socosho macnaheedu waa in ilmuhu bilaabay taxanaha tallaalka oo uu haysto ballanta qaadashada xigta. Ballantan waa in la ilaaliyaa oo diiwaan cusbooneysiin ah la siiyaa dugsiga. Haddii ballanta la ilaalin waayo, ilmaha kuma sii jiri doono u socoshadan oo uma hoggaansamin. (tusaale, taxanaha tallaalka Hep B waa la bilaabay laakiin ilmaha uma qalmin inuu helo qaadashada xigta ee taxanaha.)
- Ka dhaafitaanada Diimeed (Imm.P.11A) iyo Caafimaad (Imm.P.12) waa la ogolyahay. Kaarka ka-dhaafitaanka ee ku habboon waa inuu ku jiraa faylka. Carruurta aan la tallaalin waxay ku qasban yihiin in laga saaro dugsiga marka ay dillaacaan cudurro tallaalka looga hortagi karo

Tallaalkada loogu Baahan yahay Imaanshaha Dugsiga	Qaadashada Loo Baahan yahay Fasal ahaan												
	K	1	2	3	4	5	6	7	8	9	10	11	12
DTaP/DTP/DT <sup>1</sup>	4+	4+	4+	4+	4+	4+	4+	4+	4+	4+	4+	4+	4+
Tdap <sup>2</sup>									1	1	1	1	1
MCV <sup>3</sup> (Meningococcal Conjugate)									1	1	1	1	2
IPV (Polio) <sup>4</sup>	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+
MMR <sup>5</sup>	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2
Hepatitis B <sup>6</sup>	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+	3+
Varicella <sup>7</sup>	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	2	1

- Qaadashada ugu dambeysa ee bisha afaraad iyo qaadashada ugu dambaysa ee xiiq-dheerta kahor bisha toddobaad. **Inta ugu badan ee loo baahan yahay:** lix qaadasho.
- Fasallada 8-12:** Tdap, oo ay ku jirto tallaalka xiiq-dheerta, ayaa loo baahan yahay.
- Fasalka 8-11:** Hal qaadasho oo ah MCV ayaa loo baahan yahay. Qaadashada waa in la siiyaa 10 sano kadib  
**Fasalka 12:** Laba qaadasho oo MCV ah ayaa loo baahan yahay haddii aan la siin qaadashadii ugu horreysay arday jira 16 sano ama ka weyn, markaas oo keliya hal qaadasho ayaa loo baahan yahay. Ugu yaraan hal qaadasho waa in la siiyaa kadib da'da 16 sano.
- Xaddaanada-Fasalka 11:** Qaadashada ugu dambeysa waa in la qaataa bisha afraad ama kadib. Inta udhaxaysa qaadashada xigta iyo tan ugu dambeysa waa inay ahaataa ugu yaraan lix bilood.  
**Fasalka 12:** Qaadashada ugu dambeysa bisha afraad ama kadib. Isku-dar kasta oo ah afarta qaadasho ee IPV iyo OPV wuxuu ka kooban yahay taxane dhammaystiran. **Inta ugu badan ee loo baahan yahay:** afar qaadasho.
- Qaadashada ugu horreysa waa in la siiyaa da'da laba iyo toban bilood ama kadib.
- Waa inuu jiraa ugu yaraan afar toddobaad oo u dhaxaysa qaadashada koowaad iyo tan labaad; ugu yaraan 8 toddobaad oo u dhaxaysa qaadashada labaad iyo saddexaad; ugu yaraan 16 toddobaad oo udhaxaysa qaadashada koowaad iyo saddexaad oo qaadashada ugu dambeysa waa in la siiyaa ugu dambeyn da'ada 24 toddobaad.
- Qaadashada ugu horreysa waa in la siiyaa da'da laba iyo toban bilood ama kadib.  
**Xaddaanada-Fasalka 11:** Sida caddaynta cudurka, daryeel bixiye caafimaad oo ruqsad haysta ayaa saxeexi kara oo kula meeleeyn kara dugsiga bayaan qoraal ah oo caddaynta bisha iyo sannadka ee cudurka busbuska (busbus) ee hore.  
**Fasallada 12:** Sida caddaynta cudurka, waalid/masuul ama MD ama DO ayaa saxeexi kara oo faylka ku dhigi kara dugsiga bayaan qoraal ah oo caddaynta bisha iyo sannadka ee cudurka busbuska (busbus) ee hore.

